



## Atrial Septal Defect (ASD) Repair

Cilladda Duleelka Darbiga Wadnaha ama ASD



Ogeysiis

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

**Qalliinka Xiritaanka ah ee Cilladda Duleelka Darbiga Wadnaha**  
**(eeg Atrial Septal Defect (Duleelka Darbiga Wadnaha))**  
Surgical Closure of Atrial Septal Defect  
(see Atrial Septal Defect)

**Cilladda ASD Qeybta Dhexe:**

- Qaar badan si kedis ah ayeyu xirmaan
- **Waxqabadka Gelinta Tuubada:** Amplatzer™ oo ah qalab ayaa darbiga lagu xirayaa (Abbott) ama Gore<sup>R</sup> Cardioform ayaa loo isticmaali karaa in lagu xiro duleelka iyadoo tuubada la gelinayo xididdada lugta ilmaha. Qalabkan waxaa loo adeegsadaa ASDs waaweyn ee Qeybta dhexe.
- **Qalliin:** Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Waxaa ilmaha lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). ASD ugu horreynta waxaa si abaddan ah loogu xirayaa toolid ahaan ama waxaa sharooto u noqonaya kii xuubka wadnaha (xuub kiish ah oo ku wareegsan wadnaha).

**Patent foramen ovale (Duleelka qeybta kore ee wadnaha ama PFO):** Badanaa si kedis ah ayey u xirmaan ama uma baahna qalliin waxqabad ah.

**Cilladda ASD Qeybta Hoose:**

- **Qalliin:** Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Waxaa ilmaha lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). ASD sharooto ahaan ayey iskula dhageysaa balastar bukaanka xuubkiisa wadnaha (xuub kiish ah oo ku wareegsan wadnaha). Cilladdan waxaa badanaa lala xiriiriyaa “dillaac,” ama god, lagu arko muruqa dhiigga celiya. Sida caadiga ah “dillaaca” waxaa lagu hagaajiyaa tolliin. Daboolka waa la tijaabinayaa si loo hubiyo inuusan wax daadineyn oo isku dhegganeyn.

**Wadnaha qeybta dambe ee aan caadiga ahayn ee ASD (oo ay weheliso ama aysan wehelin partial anomalous pulmonary venous return (xididdo sambab oo aan caadi ahayn oo soo noqonaya ama PAPVR)):**

- **Qalliinka sharootada xiritaanka:** sharootada wadnaha ayaa badanaa loo isticmaalaa in lagu xiro ASD intuu ilmaha ku xiran yahay mashiin isku ah wadne-sambab (kor ka eego)
- **Habka qalliinka hagaajinta Warden:** Dhuunta kore ee dhiigga soo celisa ayaa laga saarayaa meesha ay uga xiran tahay qeybta midig kore ee wadnaha iyo tolliinka qeybta midig kore ee wadnaha. Wadnaha qeybta dambe ee aan caadiga ahayn ee ASD xuubka wadnaha ayaa sharooto u ah.

**Qeybta dambe ee wadnaha ee aan saqafka lahayn:**

- **Qalliin:** Hal sharooto, oo badanaa ah xuubka wadnaha, ayaa loo isticmaalaa in lagu xiro qulqulka dhiigga wadnaha ee qeybta kore midig. Sharooto kale ayaa markaas loo isticmaalaa in lagu xiro ASD (kor ka eego)

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- **Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka:** 3 ilaa 4 saac
- **Leymanka Caadiga:** Carruurta intooda badan waxay ku noqon doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka iyaga oo ku tuubbo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, iyo kateetarahe Foley oo ah kan kaadidu geleyso.
- **Soo-kabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-dib:** Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa wax yar ka dib qalliinka. Tuubbada dhexe ayaa loo deynayaa ilaa inta dhiig laga qaadayo iyo si daawo looga siiyo. Tuubooyinka xabadka badanaa waxaa looga saarayaa 24 ilaa 48 saac qalitaanka ka dib, markuu yaraado dheecaanka ka soo baxaya.
- **Wakhtiga caadiga ah ee joogitaanka isbitaalka:** Wuxuu ilmuhu caadi ahaan joogi doonaa isbitaal-ka 3 ilaa 5 maalmood ka dib qalitaanka hagaajinta ah ee ASD.

---

**Qalliinka Xiritaanka ah ee Cilladda Duleelka Darbiga Wadnaha**  
**(eeg Atrial Septal Defect (Duleelka Darbiga Wadnaha))**  
Surgical Closure of Atrial Septal Defect  
(see Atrial Septal Defect)

**Qaashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dibqalitaanka hagaajiyaha ah ee ASD:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin) looga hortago xinjirowga ka dib gelinta qalabka tuubada ah